

## Booqashada Maqasiinka Cuntada

### Waa Maxay Maqasiinka Raashinka?

Xarun ay shakhsiyaadka iyo qoysaska u baahan cunto ay ka heli karaan raashiin mudo dhan 3 maalmood lacag la'aan. Maqasiinka raashiinka ma'aaha hay'ado dawladeed, waa ururo samafal oo ujeeddadoodu tahay inay quudiyaan adiga iyo qoyskaaga.

### Sideed ku heli kartaa Maqasiinka Raashiinka?

Weydii deriskaaga, ama hay'adaha ku taageera, si ay kaaga caawiyaan inaad u hesho maqaasiin cunto.

Sidoo kale, waxaad booqan kartaa **FreshTrak.com** si aad u hesho liiska cuntada iyo barnaamijyada cuntada ee ka dhaw agagaarka koodhka boostadaada.

### Maxaa laga filan karaa iyo maxaad la imaanaysaa maqaasiinka raashiinka marka kugu horeysa ee aad soo booqanayso?

1. Filo inuu jiro leen oo laga yaabo inaad sugto mudo dhan 30 daqiiqo ka hor inta aan lagu adeegin. Isku day inaad soo booqato gelinka dambe ee maallintii.
2. Waxaad wadaagi doontaa inta qof ee ku nool gurigaaga iyo da'dooda.
3. Keen caddaynta aqoonsigaaga (nooc kasta oo aqoonsi oo sawir leh) - shatiga darawalnimada, baasaboort, \* fadlan ogow in aqoonsiga lagaaga baahan doono mar kasta oo aad booqanayso maqasiinka raashiinka.
4. Xaqiiji cinwaankaaga adiga oo keenaya heshiis kiro, gabal boosto ah ama biilka tamarta oo ciwaankaaga hadda uu ku qoran yahay.
5. Waa inaad buuxisaa shuruudaha dakhliga wakhtiga adeega si aad u hesho raashiinka. Tani waa iskaa u cadee oo wax cadayn ah looma baahna.
6. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo in dhammaan macluumaadkaaga aad wadaagtay inay sax yihiin.

### Raashiin nooc ee ah ayaad ka heli doontaa maqaasiinka raashiinka?

Alaabta raashiinka way ku kala duwanaan kartaa maqaasiin kasta. Waa fikrad wanaagsan inaad booqato qolka raashiinka si aad u aragto waxa la heli karo oo aad ka fikirtaa waxa aad isu geyn karto si aad cunto u karsato.

Goobaha raaashiinka qaarkood, waxaa lagu ogolaan doonaa inaad gasho maqaasiinada cuntada oo aad ka adeegato. Kuwa kale waxay yeelan doonaan meelo la maro oo aad ka soo qaadan karto sanduuqyada cuntada ee horay loo diyaariyey. Tabarucayaal ayaa kuugu rari doonaan gaarigaaga.

### Talooyin Wax ku'ool Ah:

- Weydii wax ku saabsan "waxyaabaha dheeraadka ah" sida xafaayadda iyo masaxarada, cuntada xayawaanka ama alaabta daryeelka shakhsi ahaaneed.
- Haddii aad leedahay saaxiib kaa caawin kara turjumaada, Haku soo raacan.
- Haddii aad leedahay baahi cunto oo gaar ah, fadlan u sheeg shaqaalaha Maqasiinka.
- Weydii caawimo kusaabsan adeegyada kale sida cuntada ama gargaarka caafimaadka.
- Tag maalmaha kala duwan ee toddobaadka.
- Si Wanaagsan oo Xushmad leh ula dhaqan Shaqaalaha.